# هداية المستفيد في أحكام التجويد


الكاتب

ابو ريمة، محمد المحمود النجار.


# Hagaha Cilmiga Tajwiidka


Waxa turjumay Sheekh

Abdulaziz Mohamed Oogle

# Hordhac

Waxaad qeexdaa ereyga Tajwiid luuqad ahaan iyo erey bixin ahaanba?
Luuqad ahaan: tajwiidku waa in wax la hagaajiyo, la wanaajiyo.
Ereybixinta tajwiidku waa: cilmi lagu barto in lasiiyo xaraf kasta xaqiisa iyo wuxuu mutaystay sida qaabka loo soo saaro xarafka, inta la jiidayo (madka) iyo in la yaraynayo ama la wayneynayo xarafka iyo wixii lamida.

Waa maxay hadafka barashada cilmiga Tajwiidku?
Hadafkiisu waa in la gaadho halka ugu wanaagsan ee ku dhawaaqida Quraanka qaabkii lagala kulmay nabigeenii aftahanka ahaa. Waxa kale oo la yiri: Hadafkiisu waa in kitaabka Ilaahay laga dhawro qaladaadka iyo gafafka.

# Axkaamta isticaadada iyo bisin qabsashada

Imisa qaab ayaa loo akhrin karaa isticaada (shaydaanka inaad iska naarto), bisinka qabsato iyo inaad suurada bilowdo?
Waxa jira afar qaab oo kala ah:

1. In lakala gooyo dhamaantood (mid kasta gaarkeeda loo akhriyo) isticaada kaligeed in la akhriyo, bisinkana kaligii in la akhriyo, aayada u horaysa suuradana kaligeed la akhriyo.
2. In bisinka iyo bilowga suurada la isku xidho, halka isticaadada si gaara loo akhriyo.
3. In la isku xidho isticaadada iyo bisinka kadibna la istaago oo bilowga suurada si gaara loo akhriyo.
4. In la isku xidho dhamaantood; isticaadada, bisinka iyo bilowga suurada.

Imisa qaab ayaa jira marka la akhrinayo bisinka u dhexeeya suurada dhamaatay iyo suurada la bilaabayo?
Waxa jira afar qaab; sadex ayaa banaan, midna ma banaa.

1. In lakala gooyo dhamaantood (aayada u danbaysa suurada dhamaatay la akhriyo kaligeed, bisinkana kalidii la akhriyo, aayada u horaysa suurada bilaabmaysana kalideed la akhriyo).
2. In la isku xidho bisinka iyo bilowga suurada bilaabmaysa, halka aayadii u danbaysay suuradii dhamaatayna kalideed la akhrinayo.

3. In la isku xidho dhamaantood (aayadii u danbaysay suuradii dhamaatay, bisinka iyo aayada u horaysa suurada bilaabmaysa).
4. Ta afaraad ee aan banaanayn waa in la isku xidho aayada u danbaysa suuradii dhamaatay iyo bisinka kadibna inta la istaago la akhriyo bilowga suurada bilaabmaysa. Sababta aanay u banaanayn waa ayadoo dadku u malayn karaan in bisinku kamid yahay suuradii dhamaatay.

# Axkaamta nuunka reeban iyo tanwiinta

Nuunka reeban waa xarafka (نْ) ee sukuuntu dul saarantahay, tanwiintuna waa nuun dheeraada oo gala magacyada xagooda danbe, kaasoo aan la qorin balse lagu dhawaaqo.

Wuxuu u qaybsamaa sadex nooc oo kala ah: laba kordhigan (-َ), laba hoos dhigan (-ً) iyo laba godan (-ُ).

Nuunka reeban iyo tanwiintuna waa isku axkaam, sababtoo ah tanwiintu waa nuun aan la qorin balse lagu dhawaaqo.

Imisa xaaladood ayay noqdaan nuunka reeban iyo tanwiintu?
Axkaamta nuunka reeban iyo tanwiintu waa afar, waxayna kala yihiin:

1. Idhaar (muujin).
2. Idqaam (is dhex gal).
3. Iqlaab (isku badal).
4. Ikhfaa (qarid).

# Idhaarka (muujinta)

Waa maxay Idhaarku luuqad ahaan iyo erey bixin ahaanba?
Luuqad ahaan: waa cadayn ama in wax la bayaamiyo.

Ereybixintiisuna waa: in xaraf kasta lagasoo bixiyo booskiisa ayadoo aanay la soconin wax qunne ah (sanqaroor ka hadal) in sanka hawo lagasoo bixiyo.

Waa imisa xuruufta Idhaarku?
Xuruufta idhaarku waa lix xaraf oo kala ah: hamze (ء), haa (ه), cayn (ع), xaa (ح), qayn (غ) iyo khaa (خ).
Waxa lagu ururiyay bilowga xuruufta kalmadahan ku jira tuducan:

أَخِئ هــاْك ِعلْما حاْزه َغيرُ خاْسر

Waxaad xaraf kastaba ka bixisaa tusaale:

| Tanwiinta | Laba kalmadood | Hal kalmad | Xarafka |
|---|---|---|---|
| رَسُوْلٌ أَمِيْنٌ | مَنْ ءَامَنَ | يَنْأَوْنَ | أ |
| جُرُفٍ هَارٍ | إِنْ هُوَ | يَنْـهَوْ نَ | ه |
| سَمِيعٌ عَلِيمٌ | مِنْ عَلْمٍ | يَنْعِقُ | ع |
| عَلِيمٌ حَكِيْمٌ | مِنْ حَسَنَةٍ | يَنْحِتُوْنَ | ح |
| عَزِيزٌ غَفُورٌ | مِنْ غِلٍّ | فَسَيُنْغِضُونَ | غ |
| قَوْمٌ خَصِمُونَ | مِنْ خَيْرٍ | وَالْمُنْخَنِقَةُ | خ |

Tusaalooyinkaa uga qiyaas qaado.

# Idqaamka (is dhexgalka)

Waa maxay Idqaamku luuqad ahaan iyo ereybixin ahaanba?
Luuqada ahaan: waa in la is dhex galiyo laba shay.
Ereybixin ahaana; waa kulanka xaraf reeban iyo mid xarako wata oo isku noqda hal xaraf oo la adkeeyay (shad wata) oo carrabkuna sare u kacayo marka lagu dhawaaqayo.

Waa imisa xuruufta Idqaamku?
Xuruufta Idqaamku waa lix: waxa lagu ururiyaa kalmadan (يَرْمَلُوْنَ), waa xuruufta ku jirta kalmadaas.

Imisa qaybood ayaa loo qaybiyaa xuruufta idqaamka?
Waxa loo qaybiyaa laba qaybood; qayb wadata qunne (sanqaroorka in hawo kasoo baxdo), waxa noocaas loo yaqaanaa naaqus (is dhexgal kala dhiman), waana afar xaraf oo kala ah (ي، و، م، ن) Qaybta kalena waa mid aan qunne wadanin oo loogu yeedho; is dhexgal dhamaystiran, waana laba xaraf oo ah (ل، ر)

# Qaybta wadata qunnaha.

Tusaalooyin ka bixi sida ay ukala horreeyaan:

1. Tusaalaha nuunkii reebnaa oo xarafka ya (ي) gadaasheeda dhacay: (إِنْ يَقُوْلُوْا), waxa la is dhex galinayaa nuunka reeban iyo xarafka ya.
   i.
   Tusaalaha tanwiintii oo xarafka ya (ي) gadaasheeda dhacay: ( لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ) tanwiintii ayaa la dhex galiyay xarafka ya.
   ii.
   Waxa shardiya in labada xaraf ee la is dhex galinayo ay ku kala jiraan laba kalmadood, hadiise ay ku jiraan hal kalmad kaliya markaa waxa waajiba in la muujiyo sida kalmadahan: ( دُنْيَا وقِنْوَان وصِنْوَان وبُنْيَان) halkan nuunka ku jira waa la muujinaya cabsi laga qabo inuu xarafku u ekaado mid la adkeeyay ama la shaday, maxaa yeelay hadii la is dhexgaliyo nuunka iyo ya' da ama nuunka iyo waaw' ga waxa isku qaldamaya xarafkii asalkiisu nuunka uu ahaa kadibna la idqaamay iyo kii asalkiisu ahaa shadka (صِوَّان) oo xarafka waaw' ga iyo ya' da marka la shado ama la adkeeyo wuxuu u ekaada nuun lagu idqaamay ama la dhex galiyay waaw' ga iyo ya.
   iii.
2. Tusaalaha nuunkii reebnaa iyo tanwiintii oo miim (م) gadaasheeda dhacay:
   (مِّن مَّلْجَإٍ) waxa la is dhex galinayaa nuunka reeban iyo xarafka miimka.
   Tanwiinta oo la dhexgalinayo xarafka miimka (م) waxa tusaale u ah: (هُدًى مِّن رَّبِّهِمْ)
   Waxa la is dhex galiyay tanwiinta laba kordhigan iyo miimka.
   i.
3. Tusaalaha nuunka reeban iyo tanwiinta oo xarafka waaw (و) gadaasheeda dhacay; (مِنْ وَرَائِهِمْ) nuunka reeban iyo waa' ga ayaa la is dhex galiyay.
   Tusaalaha tanwiintuna waa: (هُدًى وَرَحْمَةً), tanwiinta laba kordhigan ayaa la dhex galiyay xarafka waaw' ga.
   i.
4. Tusaalaha nuun reeban oo iyo tanwiinta oo xarafka nuun (ن) gadaasheeda dhacayo: (إِنْ نَقُوْلَ) labada nuun ayaa is dhex galay ayagoo isku noqday hal nuun oo la adkeeyay.
   Tanwiintana tusaalaheedu waa: (حِطَّةٌ نَّغْفِرْ), tanwiinta laba godan ayaa la dhex galiyay xarafka nuunka.

## Qaybta aan qunnaha wadanin:

Tusaalooyin ka bixi qaybta aan qunnaha wadanin:

1. Xarafka laamka (ل) oo ka danbeeya nuunka reeban ama tanwiin, waxa tusaale u ah: (يُبَيِّن لَّنَا), waxa la is dhex galiyay nuunkii reebnaa iyo laamkii.
   Tanwiinta oo xarafka laamku ka danbeeyo waxa tusaale u ah: (هُدًى لِّلْمُتَّقِينَ), tanwiinta laba kordhigan waxa la dhex galinayaa xarafka laamka.

2. Xarafka Ra (ر) oo uu ka danbeeyay nuun reeban ama tanwiin. Tusaale: (مِّن رَّبِّهِمْ), nuunka reebana ayaa la dhex galinayaa xarafka Ra.
   Tanwiinta oo ka danbaysa nuunkii reebnaa, tusaalaheedu waa: (غَفُورٌ رَّحِيمٌ). Xarafka Ra oo wata tanwiin laba godan ayaa la kulmay xaraf kale oo ra, markaa waa la is dhex galinaya si hal xaraf oo adag ay u noqdaan.

# Iqlaabka (isku badalka)

Waa maxay Iqlaabku luuqad ahaan iyo ereybixin ahaanba?
Luuqad ahaan: waa in wax la qallibo ama qaabkiisii wax laga badalo.
Ereybixin ahaana waa in xaraf lagu badalo xaraf kale ayadoo lala imanayo qunnaha (sanqaroor kahadalka).

Waa imisa xuruufta Iqlaabku?
Waa hal xaraf kaliya waana ba' da (ب).

Waxaad keentaa tusaalooyin?
Tusaalaha nuunkii reebnaa oo xarafka ba (ب) gadaasheeda dhacday kaasoo ka kooban laba kalmadood waxa weeya: ( مِنْ بَعْدِ) waxa nuunka reeban lagu badalayaa xarafka miim (م) dhawaaq ahaan.
Isagoo hal kalmad ahna waxa tusaale u ah: (يَنْبُتُ) waxaad nuunka reeban ku badashaa miim dhawaaq ahaan.

Tanwiintii oo xarafka ba (ب) gadaasheeda dhacdayna waxa u daliila: (سَمِيعٌ بَصِيرٌ), tanwiinta laba kordhigan waxaad ku badashaa xarafka miim (م) dhawaaq ahaan. Sidoo kale waxa tusaale u ah: (أَلِيْمٌ بِمَا كَانُوْا) tanwiinta laba kordhigan ku badal xarafka miimka dhawaaq ahaan.

# Ikhfaa (Qarinta)

Waa maxay Ikhfaa luuqad ahaan iyo ereybixin ahaanba?
Luuqad ahaan: waa in wax la asturo ama la qariyo. Ereybixin ahaana waa in lagu dhawaaqo xaraf reeban oo sukuun wata kaasoo ka madhan adkayn (shad), dhawaaq ahaan u dhexeeya Idhaarka iyo Idqaamka ayadoo qunnadu la socoto, xarafka reebana waa nuunka iyo taniinta oo ay isku xukun yihiin.

Waa imisa xuruufta Ikhfaagu?
Waa shan iyo toban xaraf, waxa lagusoo ururiyaa xuruufta u horaysa kalmadaha tuducan gabayga ah uu ka kooban yahay.

صِفْ ذَا ثَنَا كَمْ جَادَ شَخْصٌ قَدْ سَمَا    دُمْ طَيِّبًا زِدْ فِي تُقَى ضَعْ ظَالِمًا

Waxaad keentaa tusaalooyin?
Tusaale ahaan nuunkii reebnaa oo xarafka saad (ص) gadaasheeda dhacay: (عَنْ صَلَاتِهِمْ) laguma dhawaaqayo nuunka reeban kaliya waa la qarinayaa, sidoo kale qunnihii ayaa meesha imanaya. Kaasii waa tusaale ka kooban laba kalmadood, isagoo hal kalmad ahna waxa tusaale u ah: (أَنْصُرْنَا), nuunka reeban laguma dhawaaqayo, qunne ama sanqaroor ka hadal ayaa lala imanaya.
Tanwiintii oo xarafka saad (ص) ka daba dhacay; (قَوْمًا صَٰلِحِينَ), tanwiintan laba kor dhigan laguma dhawaaqayo, waxa lala imanayaa qunne.

Tusaalooyinkan uga qiyaas qaado, xuruufta kale ee kor lagu xusay.

# Axkaamta miimka reeban

Imisa xaaladood ayuu noqdaa miimka reeban?
Miimka reeban wuxuu noqdaa sadex xaaladood mid un: Idqaam (in la is dhex galiyo), ikhfaa (qarsoomid) iyo idhaar (muujin).

Goormaa la idqaamaa (la is dhex galiyaa)?
Waxa la is dhex galiyaa marka miimka reeban uu la kulmo xaraf kale oo miim ah, waxa sidoo kale la soconaya qunne (sanqaroor ka hadal) dhamaystir, waxaana loogu yeedhaa: is dhexgal isku mid ah.

Tusaale ahaan: (وَلَكُمْ مَّا كَسَبْتُمْ), (لَكُمْ مَّا فِي الْأَرْضِ ), (لَهُمْ مَّثَلًا) waa in la is dhex galiyo miimka reeban iyo miimka ka danbeeya, kadibna waa inay noqdaan hal miim oo la adkeeyay oo uu la socdo qunne dhamaystiran.

Goormaa Ikhfaa (qarsoomid) laga dhigaa?
Marka miimkii reebnaa uu la kumo xarafka ba (ب) ayaa la qariyaa ayadoo qunne la raacinayo, waxaana loogu yeedhaa qarin afeed.
Tusaale ahaan: (وَهُمْ بِالْآخِرَةِ) ,(تَرْمِيهِمْ بِحِجَارَةٍ) miimka reeban wuxuu la kulmay xarafkii ba (ب), sidaa awgeed waa la qarinayaa miimka reeban, waxaana lala imanayaa qunne.

Goormaa la muujinayaa miimka reeban (Idhaar)?
Dhamaan xuruufta soo hadhay waa la muujinaya miimka reeban, waxa si adag loo muujinaya marka miimkii reebnaa uu la kulmo xarafka waaw (و،ي) iyo ya, waxaana loogu yeedhaa muujin afeed.

Tusaale ahaan: (عَلَيْهِمْ وَلَا الضَّالِّينَ) (وَهُمْ فِيهَا), waa la muujinayaa miimkan reeban ee waaw iyo xarafka fa (ف) ka danbeeya.

# Miimka iyo nuunka la adkeeyay (shad)

Sheeg xukunka miimka iyo nuunka la adkeeyay?
Xukunkoodu waa in la muujiyo iyo in qunne (sanqaroor ka hadal) loo yeelo marka la adkaynayo, sida: ( مِنَ الْجِنَّةِ وَالنَّاسِ) waxa la adkeynayaa xarafka nuunka, nuunka shadka watana waa laba nuun oo la is dhexgaliyay kadibna la adkeeyay. Sidoo kale xarafka miimka marka la adkeeyo waxa tusaale u ah: (ثُمَّ) iyo (لَمَّا), marka la adkeeyo waa in ay la socotaa qunne oo aan marnaba ka faaruqayn.

# Axkaamta (أَل) macrifada

Hadii (أَل) macrifada (la isla garanayo) ay gasho xuruufta higaada imisa xaaladood ayay noqotaa?

Waa laba xaaladood; qamariyyah (ta gasha eryaga Al-Qamar) taasoo la muujiyo laamka ku jira iyo ta shamsiya (oo gasha ereyga ash-shamsu) taasoo la qariyo laamka ku jira.

Waa maxay laamka gala ereyga Al-qamar?
Waa laamka la muujiyo hadii afar iyo tobankan xarafka ay gadaashooda dhacaan, xuruuftaas oo ku jirta tuducan yar ee gaaban.

ابْغِ حَجَّكَ وَخَفْ عَقِيمَهُ

Tusaale: الْأَنْعَامِ - الْبَرُّ – الْغَمَامُ - ا لْحَمِيْمُ – ا لْجَنَّةُ - الْكَوْثَرُ - الْوِلْدَانُ - الْخَيْرُ - الْفِتْنَة -الْعَافِيْ
iyo wixii lamida waana la muujinayaa laamka ku jira kalmad kasta sida loo muujiyo laamka ku jira Al-Qamar.

Waa maxay laamka gala ereyga Ash-shamsu?
Waa laamka la muujiyo hadii afar iyo tobankan xaraf gadaashooda dhacaan, kuwaasoo lagusoo ururiyay bilowga xuruufta u horreeya kalmadaha ku jiraya tuducan:’

طِبْ ثُمَّ صِلْ رَحِمًا تَفُز ضِفْ ذَاْ نَعِمٍ دَعْ سُوْءُ ظَنٍّ زُرْ شَرِيْفًا لِلكَرَمِ .

Tusaale: (الطَّامَّةُ), iyo (الصَّاخَّةُ) waxa la qarinayaa laamka, waxaana mar walba ka danbeeya laamka xaraf shad wata ama la adkeeyay.

Waa maxay calaamada lagu garto laamka ku jira Al-Qamar iyo Ash-shamsu?
Calaamada lagu garto in laamku yahay Qamari, waa sukuunta ama in la reebo laamka oo kadibna aad muujiso.

Halka laamka Shamsiga ahna laga qariyo oo xarafka ka danbeeyana uu wato shad ama adkayn.

# Laamka (ل) ficilka gala

Waa maxay xukunka laamka gala ficilka?
Laamka gala ficilka xukunkiisu waa in la muujiyo mar kasta, ha ahaado ficilku; ficilka maadi (فعل ماضي) (fal hadda kahor dhacay) ama ficil amar (فعل الامر ).
Ficilka maadi, waxa laamku ka galaa xagiisa danbe ama dhexdiisa, balse ficilka amar waxa laamku ka galaa gadaashiisa.
Tusaalaha laamka galay ficilka Maadi:

(جَعَلْنَا ضَلَلْنَا قُلْنَا إلْتَقَى)

Tusaalaha laamka galay ficilka Amar:

(قُلْ نَعَمْ)

# Idqaamka (Is dhexgal)

Waa maxay Idqaamk?
Idqaamku waa qaabka la isu dhexgaliyo laba xaraf.

Imisa qaybood ayaa loo qaybiyaa?
Idqaamka waxa loo qaybiyaa sadex qaybood oo kala ah: laba isku mida (laba xaraf oo isku mid ah), laba xaraf oo isu dhow iyo laba xaraf oo isku jinsi ah.

Maxay yihiin labada isku midka ah?
Waa labada xaraf ee isku meel kasoo baxa, isku qaabna usoo baxa sababtoo ah waa isku hal xaraf sida laam iyo laam (ل ،ل) xukunkooduna waa in la is dhexgaliyo maadaama labada xaraf ay isku midyihiin.

Tusaale ahaan: (إضْرِبْ بِعَصَاْكَ) waxa la is dhexgaliyaa labada xaraf ee ba (ب), waxay isku noqonayaan hal xaraf oo shad wata ama la adkaynayo.
Waxa lamida tusaalooyinkan: (اذْ ذَهَبَ مُغَاضِبًا), (بَلْ لَاْ يَخَاْفُوْنَ), (وقَدْ دَخَلُوا)

Maxay yihiin labada xaraf ee isu dhow?
Waa labada xaraf ee meesha ay kasoo baxaan iyo qaabka ay usoo baxaan isu dhowyihiin, sida xarfta (ث) iyo xarafka (ذ). Tusaale: ( يَلْهَثْ ذَالِكَ), (يَاْ بُنَيَّ ارْكَبْ مَعَنَا), (أَلَمْ نَخْلُقْكُمْ)
labada  xaraf waa la is dhex galinayaa ayadoo ay isku noqonayaa hal xaraf oo kaliya ayadoo la adkaynayo xarafka danbe.

Maxay yihiin labada xaraf ee isku jinsiga ah?
Waa laba xaraf oo hal boos kasoo wada baxa balse qaabka ay usoo baxaan kala duwanyahay sida (ط ، ت)

(لَئِنْ بَسَطْتَ , وَقَاْلَتْ طَاْئِفَةٌ , أَثْقَلَتْ دَعَوَ اللهَ , قُلْ رَبِّ , إِذْ ظَلَمُوا , )

Labada xaraf ee isku meel kasoo baxa balse qaabab kala duwan usoo baxa waa la is dhex galinayaa, waxa lagu dhawaaqayaa mar walba xarafka danbe maadaama ay is dhex galeen oo hal xaraf isku noqdeen.

# Axkaamta Madka (jiidida)

Waa maxay madku luuqad ahaan iyo erey bixintiisu?
Madku luuqad ahaan waxa la dhahaa wixii la jiido ama siyaado la socoto.
Ereybixinta madka ee cilmiyayasana waxa weeye in la dheereeyo codka marka lagu dhawaaqayo mid kamida xuruufta madka ee sadexda ah, kuwaasoo aan hoos ku xusi doono.

Imisa qaybood ayuu u qaybsamaa Madku?
Wuxuu u qaybsamaa laba qaybood oo kala ah: asal iyo farac (jirrid iyo laamo).

## Madka Asalka ah

Waa maxay madka asalka ah?
Waa madka dabiiciga ah ee xarafka madka wata aanu la'aantii istaagayn.

Maxay yihiin xuruufta madku?
Waa sadex, waxayna kala yihiin waaw (وْ) reeban oo xarafka ka horreeya wato godniin, yaa (يْ) reeban oo xarafka ka horreeya wato hoos dhig iyo alifka ( أ) reeban oo xarafka ka horreeyaa wato kordhig.

Maxaa dabiici loogu bixiyay?
Maxaa yeelay qofka fidradiisu badqabto kama yareeyo kamana dheereeyo xadka jiiditaankiisa.

Qiyaastii intee la jiidayaa?
Qiyaas ahaan waxa la jiidaya laba xarako "mudada lagu dhawaaqayo laba xaraf oo kamida higaada" waana isku mid hadii lagu istaagayo iyo hadii la soconayaba, in mudadaas laga yaeeyana waa xaaraan sharci ahaan.

Tusaalaha alifku waa (قال), tusaalaha waawga waa (يقول), tusaalaha yaa'da waa (قيل).

# Madka Faraca (Laamaha)

Waa maxay madka faracu (laamaha)?
Waa jiidmo dheeraada oo madkii asalka (jirrida) ahaa lagu darayo, sababtoo ah waxa yimid hamse ama reebiniin, wuxuuna u qaybsamaa sadex iyo toban qaybood:

1. koowaad: jiidmada waajibka ah ee xiriirsan.
2. Laba: jiidmada banaan ee kala tagsan.
3. Sadex: jiidmada lagu istaago reebniinka.
4. Afar: jiidmada badalka.
5. Shan: jiidmada lagu istaago tanwiinta.
6. Lix: jiidmada qasabka ah ee kalmada la cusleeyay.
7. Todoba: jiidmada qasabka ah ee kalmada la fudaydiyay.
8. Sideed: jiidmada qasabka ah ee xarafka la cusleeyay.
9. Sagaal: jiidmada qasabka ah ee xarafka la fudaydiyay.
10. Toban: jiidmada dabacsan.
11. Kow iyo toban: jiidmada sila (siyaado).
12. Laba iyo toban: jiidmada kala farqinta (kala duwid).
13. Sadex iyo toban: jiidmada tamkiin (hirgalin).

Waxaynu faahfaahin doona ayagoo tartiibtaa isugu xiga.

## Jiidmada waajibka ah ee xiriirsan

Waa maxay jiidmada waajibka ah ee xiriirsan? Intee in la eeg ayaa la jiidayaa?
Waa marka hamsada iyo madku ay kuwada jiraan hal kalmad, waxa la jiidayaa shan xarako oo ah mudada lagu dhawaaqayo shan xaraf oo higaada kamida.
Tusaale ahaan: (جَـآءَ - سُوٓءَ - شآء - سِىٓءَ ) iyo wixii lamida.

## Jiidmada banaan ee kala tagsan

Waa maxay jiidmada banaan ee kala tagsan? Intee in la eeg ayaa la jiidayaa?
Waa marka xarafka madka wata (ka la jiidayo) iyo hamsadu ay ku kala jiraan laba kalmadood. Mudada la jiidayo marka la degdegayo waa laba xarako, dhexdhexaadkuna waa afar xarako, xaalada tartiilka (qunyar loo akhrinayo) waa shan xarako.
Tusaale ahaan: (يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ - قُوٓاْ أَنفُسَكُمْ) iyo wixii lamida.

- Jiidmada reebniinku istaajiyay

Waa maxay jiidmada reebniinku istaajiyay?
Waa marka la istaago kalmada xageeda danbe ayadoo xarafka lagu istaagay kan ka horeeyaa uu yahay xaraf kamida xuruufta madka dabiiciga ah wata waana alif, waaw iyo yaa. Tusaale: (ٱلْعِقَابِ- خَالِدُونَ- خَبِيرٌ) , waxa banaan in loo jiido sadex qaab; mid dheer waana lix xarako, dhexdhexaad waana afar xarako iyo mid gaaban waana laba xarako balse waxa ugu fiican oo dhamaystiran ta lixda la jiidayo.

Maxaa loogu bixiyay jiidmada reebniinku istaajiyay?
Sababtoo ah waxa kahor yimid sukuun (reebniin) marka la istaagayo, hadii aan la istaagayn wuxuu noqonayaa madkii dabiiciga ahaa (laba xarako).

- Jiidmada badalka

Waa maxay jiidmada badalku?
Waa marka madka (jiidmada) iyo hamsadu ay ku kulmaan hal eray balse hamsadu ay ka horrayso madkii. Tusaale ahaan: (آدَم - إِيمَانُ) asalkiisu wuxuu ahaa: (أَأْدَم -إِأْمان) waxay ahaayeen laba hamse.

- Jiidinta lagu istaago tanwiinta

Waa maxay jiidinta lagu istaago tanwiinta?
Waa in lagu istaago tanwiinta kor dhigan ee ku jirta kalmad xageeda danbe, waxa la jiidaana laba xarako. Tusaale: ( عَلِيمًا حَكِيمًا ).

- Jiidmada qasabka ah ee kalmada la cusleeyay.

Waa marka xarfka madka uu ka danbeeyo xaraf kale oo wata shad ama adkayn, kuwaaso ku jira hal kalmad. Tusaale ahaan: ( ٱلطَّآمَّةُ - ٱلصَّآخَّةُ - وَلَا ٱلضَّآلِّينَ) iyo wixii lamida.
Mudo intee la eeg ayaa la jiidayaa?
Waxa la jiidayaa lix xarako, mudada lagu dhawaaqo lix xaraf oo kamida xuruufta higaada.

- Jiidmada qasabka ah ee kalmada la fudaydiyay.

Waa marka xarafka madka leh uu ka danbeeyo xaraf wata reebniin ama sukuun. Tusaale ahaan: (ءَآلْـَٰٔنَ - ءَآلْـَٰٔنَ ) laba jeer ayay ku jirtaa suuratu Yuunus.
Mudo intee la eeg ayaa la jiidayaa?
Waxa la jiidayaa lix xarako.

- Jiidmada qasabka ah ee xarafka la cusleeyay.

Waa inay jirto xaraf kamida xuruufta googa'an ee suuraduhu ku bilaabmaan, kaasoo ku dhawaaqidiisu tahay sadex xaraf, xarafka dhexena uu yahay xaraf kamida xuruuftii madka, ka sadexaadna uu yahay xaraf reeban. Hadii la is dhex galiyo xarafka sadexaad iyo xarafka higaad ahaan ku xiga waxay noqonayaan mid wata shad ama adkayn.

Tusaale ahaan: (الٓمٓ), xarafka laamka ku dhawaaqidiisu waa sadex xaraf oo kala ah (ل، ا، م) kadibna sadexdii xaraf ayaa la isu gaynayaa wuxuun soo baxayaa sidan (لَآمْ). Xarafka madka wata ee alifka waxa la jiidayaa lix xarako, maadaama xarafka u danbeeya ee sadexaad yahay miim reeban (مْ) wuxuuna la kulmayaa miim kale oo ah ka u danbeeya xuruufta googa'an ee tusaale ahaan suuratu Al-baqarah u horreeya (لَآمْ مِيْم) markaa waa in ay is dhex galaan labada miim, kuwaas oo isku milmaya oo noqonaya miim wata shad ama adkayn, (لَآمِّيْم). Sidaa awgeed waa in la jiidaa alifka madka wata iyo ya'da madka wadata mid walba lix xarako.

Hadii aanay is dhex galayna wuxuu noqonayaa mid fudud oo aan shad ama adakyn wadan sida: (صٓ ۚوَٱلْقُرْءَانِ، نٓ ۚوَٱلْقَلَمِ، قٓ ۚوَٱلْقُرْءَانِ ), iyo wixii lamida.

Waa imisa xuruufta jiidmada qasabka ah?
Waa sideed xaraf oo la kulmiyo weedhan: (ن، ق، ص، ع، س، ل، ك، م) waxa alifka madka wata uu ku jiraa afar kamida (ص، ك، ق، ل) tusaalahoodana waxa kamida:
(صٓ ۚوَٱلْقُرْءَانِ ، كٓهيعٓصٓ، قٓ ۚوَٱلْقُرْءَانِ ٱلْمَجِيدِ، الٓمٓ)

Waxa ya'da madka leh ay ku jirtaa laba kaliya waana: (م، س) tusaalahooduna waa: (الٓمٓ، يسٓ). Waawga madka watana wuxuu ku jiraa hal xaraf oo kaliya: (نٓ).
Todobadaa xaraf waxa la jiidaa lix xarako, hase ahaatee xarafka caynka (ع) ee tusaale ahaan ku jira bilowga suuratu Maryam ( كٓهيعٓصٓ), waxa banaan in la jiido lix xarako ama ka yar, in la dhamaystiro ayaana caan ah.
Intee in la eeg ayaa la jiidayaa?
Waxa la jiidayaa lix xarako, mudada lagu dhawaaqo lix xaraf oo kamid ah xuruufta higaada.

- Jiidmada qasabka ah ee xarafka la fudaydiyay.

Waa maxay jiidmada qasabka ah ee xarafka la fudaydiyay?
Waa xuruufta googa'an ee bilowga suurada quraanka kuwaasoo marka lagu dhawaaqayo noqda laba xaraf, sida xarafka Ra'da (ر) marka lagu dhawaaqayo wuxuu wataa alif mad, wuxuu noqonayaa sidan: (رَاْ).
Imisa weeye xuruuftiisu?
Waa shan xaraf oo lagu kulmiyo weedhan: (حَيٌّ طَهُرَ), tusaalaha xarafka xa'da waa : (حمٓ), tusaalaha ya'da: (يسٓ), tusaalaha xarafka ط waxa weeye: (طه), tusaalaha ra'da waa: (الٓر).
Intee in la eeg ayaa la jiidaa?
Waxa la jiidaa laba xarako, mudada lagu dhawaaqo laba xaraf oo kamida xuruufta higaada.

- Jiidmada Dabacsan

Waa labada xaraf ee waawga iyo ya'da (و،ي) oo wata sukuun ama reebniin, waana in xarafka ka horeeyaa uu kordhigan yahay. Tusaale: (بَيْتِ، خَوْفٍ). Iyo wixii lamida.

- Jiidmada Sila (siyaado).

Waa xaraf wata mad dheeraada kaasoo dhaca Ha'da ( ه) magac u yaalka gadaasheeda, waxa la jiidaana laba xarako markuu godanyahay iyo markuu hoos dhiga yahay: tusaale; (لَّهُۥ ) (بِهِۦ).

Imisa qaybood ayay u qaybsantaa jiidmada Sila?
Waxay u qaybsantaa laba, mid gaaban iyo mid dheer.

Goorma ayay gaabantahay?
Hadii waxa kahoreeya Ha'da ( ه) uu xarako wato, tusaale ahaan: ( إِنَّهُۥ كَانَ ،وَلَهُۥ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ) hadii xarafka kahoreeya sukuun wato, ma laha wax jiidmo ah marka laga reebo ta ku jirta suuratu Faadir; ( فِيهِۦ مُهَانًا), waana qiraa'da Xafsi.
Waxa kale oo lagu shardiyaa inaan xarafka ka danbeeya noqon mid hamsadiisu xiriirsantahay, sida: ( وَلَهُ ٱلدِّينُ وَاصِبًا، أَنَّهُ ٱلْحَقُّ), lama jiidayo sida la isku waafaqsanyahay, sidoo kale hadii Ha'da ( ه) sukuun wadato lama jiidayo sida: (فَأَلْقِهْ، أَرْجِهْ).

Goorma ayay dheertahay? Intee in la eeg ayaana la jiidayaa?
Marka Ha'da ( ه) uu ka danbeeyo hamse(la kala jaray), markaa waxa banaan in shan xarako ama laba xarako la jiido, tusaale ahaan:
(عِندَهُۥٓ إِلَّا بِإِذْنِهِۦ، مِّنْ عِلْمِهِۦٓ إِلَّا بِمَا شَآءَ، وَأَنَّهُۥ هُوَ أَضْحَكَ) iyo wixii lamida.
Maxaa jiidmada Sila loogu bixiyay?
Dhawrsanaan darteed, maxaa yeelay quraanku wax dheeraada ama nuqsaana malaha.

- Jiidmada kala farqinta (kala duwid)

Wuu ku yaryahay Quraanka jiidmadani, waxay ku jirtaa afar meelood, laba waa suuratu Al-ancaam, (قُلْ ءَآلذَّكَرَيْنِ حَرَّمَ) iyo suuratu Yuunus (قُلْ ءَآللَّهُ أَذِنَ لَكُمْ) iyo suuratu Namli (ءَآللَّهُ خَيْرٌ أَمَّا يُشْرِكُونَ).
Maxaa loogu bixiyay madka kala farqinta?
Sababtoo ah wuxuu kala duwayaa waydiin iyo war, hadii aan la jiidi lahayn muu noqon lahay su'aal ama waydiin, wuxuu noqon lahaa war lasoo tabinayo, hamsada la jiiday ayaa tilmaamaysa inay su'aal tahay.

- Jiidamada Tamkiin (Hirgalin).

Waa laba xaraf oo ah ya iyo ya (ي) midkood wuxuu wataa sukuun, xatafka ka horeeyaana wuu hoos dhigan yahay wuxuuna wataa shad (adkayn). Tusaale: (حُيِّيتُم بِتَحِيَّةٍ، مِّنَ ٱلنَّبِيِّـۧنَ), iyo wixii lamida.
Maxaa tamkiin loogu bixiyay?
Sababtoo ah shadka ayaa hirgaliyay in lagu dhawaaqo.

# Axkaamta Raa (ر)

Imisa xaaladood ayay (ر) Ra'du leedahay?
Waxay martaa sadex xaaladood; in la wayneeyo ama in la yareeyo ama in labaduba banaanyihiin.

## Goormaa (ر) Ra'da la wayneeyaa?

Waa marka (رَ) Ra'du kordhigantahay ama godantahay (رُ) tusaale ahaan:
( رَبَّنَآ ءَاتِنَا، هَٰذَا ٱلَّذِى رُزِقْنَا مِن قَبْلُ).

Sidoo kale hadii ay wadato sukuun (reebniin) oo waxa ka horreeya godanyahay ama kordhiganayahay waa la wayneeyaa. (قُلْ هَاتُوا۟ بُرْهَٰنَكُمْ، مَن يَعْبُدُ ٱللَّهَ عَلَىٰ حَرْفٍ).

Sidoo kale hadii ay wadato sukuun (reebniin) oo xarafka ka horreeyaa hoos dhiganyahay, balse hoos dhigiisu yahay waa mid ka yimid reebniin oo aan asal ahayn, tusaale ahaan:
(ٱرْجِعُوٓا۟ إِلَىٰٓ أَبِيكُمْ)

Sidoo kale hadii ay wadato sukuun oo xarafka ka horreeyaana wato hoos dhig asal ah, oo xarafka ka danbeeya ra'da reebana uu yahay xuruufta korka sare aada waa la wayneeyaa: tusaale ahaan: (قِرْطَاسٍ، مِرْصَادًا، فِرْقَةٍ), iyo wixii lamida.

## Goormaa (ر) Ra'da la yareeyaa?

Waa ra'da hoos dhiga wadata, haba ku jirto kalmada bilowgeeda, dhexdeeda ama xageeda danbaba, waana isku mid haday ku jirto magac ama fal. Tusaale ahaan:

**(مِن ثَمَرَةٍ رِّزْقًا، فِيهِ رِجَالٌ يُحِبُّونَ، وَفِى ٱلرِّقَابِ وَٱلْغَٰرِمِينَ، وَٱلْفَجْرِ ، وَلَيَالٍ عَشْرٍ، وَأَرِنَا مَنَاسِكَنَا، أَنْ أَنذِرِ ٱلنَّاسَ، وَٱذْكُرِ ٱسْمَ رَبِّكَ)**

Sidoo kale hadii xarafka kahorreeya ra'da uu yahay xarafka ya'da (ي) waa la yaraynayaa, tusaale ahaan: (قَدِيرٌ ، خَيْرٌ).

Sidoo kale waa la yaraynayaa ra'da hadii xarafka ka horreeyaa wato hoos dhig asal ah oo xarafka ra'da ka danbeeyaan aanu ahayn xuruufta korka sare aada, tusaale ahaan:
**(وَأَنذِرْهُمْ ، ءَالِ فِرْعَوْنَ ، فِى مِرْيَةٍ).**

## Waa goorma marka labaduba banaanyihiin?

Waa ra'da reeban ama sukuunta wadata ee xarafka kahorreeya hoos dhig wato, xarafka ka danbeeyaana uu kamid yahay xuruufta korka sare aada oo isaguna hoos dhigan: (فِرْقٍ).

Waa maxay xuruufta korka sare aada?
Waa todoba xaraf oo dhanxanaga sare aada marka lagu dhawaaqayo, waxa lagusoo koobaan weedhan:
(**خُصَّ ضَغْطٍ قِظْ**).

# Axkaamta Qalqalada (laba dhac).

Waa imisa xuruufta laba dhacda?
Waa shan xaraf, waxay ku jiraan kalmadan: **قُطْبُ جَدٍ**

Imisa qaybood ayaa loo qaybiyaa?
Waxa loo qaybiyaa laba qaybood, mid yar iyo mid wayn. Hadii sukuunteedu tahay mid asal ah waxa loo yaqaana qalqalada yar. Hadii sukuunteedu aanay asal ahayna marka lagu istaagayo, waxa looguu yeedhaa qalqalada wayn.

Tusaalaha qalqalada yar: **يَقْطَعُونَ، يَطْمَعُونَ ، يَدْعُونَ ، لَتُبْلَوُنَّ**

Tusaalaha qalqalada wayn: **خَلَاقٍ ، سَوَاءِ الصِّرَاطِ، شَدِيدُ الْعَذَابِ، بَهِيجٍ، رُكْنٍ شَدِيدٍ**
Waxay laba dhacayaan marka lagu istaago balse hadii hore loo soconayo malaha qalqalo ama laba dhac.

# Goobaha xuruuftu kasoo baxaan

Waa imisa goobaha ay xuruuftu kasoo baxaan?
Waa todoba iyo toban goobood.
Imisa xaafadood ayay todoba iyo tobanka goobood leeyihiin?
Waxay leeyihiin shan xaafadood oo kala ah; dhuun, hunguri, carrab, dibnaha iyo sanqaroor.
Waa maxay xeerka lagu garto goobta xarafku kasoo baxo?
Waa inaad xarafka reebto (sukuun) u yeesho ama shad (adkayn) kadibna aad ka horraysiiso hamse oo aad dhagaysato, meesha codku ku dhamaado ayaa ah booska uu xarafku kasoo baxo.

Waa maxay goobta koowaad? Imisa xaraf ayaa kasoo baxa?
Goobta koowaad waa dhuunta, waxa kasoo baxa sadex xaraf oo kala ah alif, waaw iyo yaa wata sukuun: (أْ، وْ، يْ).

Waa maxay goobta labaad? Imisa xaraf ayaa kasoo baxa?
Goobta labaad waa halka ugu shishaysa hunguriga (ugu fog) waxa kasoo baxa laba xaraf oo kala ah hamsada iyo ha’da (أ، ه)

Waa maxay goobta sadexaad? Imisa xaraf ayaa kasoo baxa?
Goobta sadexaad waa badhtanka hunguriga, waxa kasoo baxa laba xaraf oo kala ah: Caynka iyo Xaa (ع، ح).

Waa maxay goobta afaraad? Imisa xaraf ayaa kasoo baxa?
Goobta afaraad waa hunguriga halka ugu dhow ee ku xiga afka, waxa kasoo baxa laba xaraf oo kala: (غ ، خ).

Waa maxay goobta shanaad? Imisa xaraf ayaa kasoo baxa?
Goobta shanaad waa carrabka halka ugu shisheysa (ugu fog) ee ku xigta hunguriga iyo dhanxanaga sare. Waxa kasoo baxa hal xaraf oo ah: Qaaf (ق).

Waa maxay goobta lixaad? Imisa xaraf ayaa kasoo baxa?
Goobta lixaad waa halka ugu shisheysa carrbka kana hoosaysa booska qaafku kasoo baxo iyo dhanxanaga sare. Waxa kasoo baxa kaafka oo kaliya. (ك).

Waa maxay goobta todobaad? Imisa xaraf ayaa kasoo baxa?
Goobta todobaad waa carrabka badhtankiisa iyo inta u dhaxaysa dhanxanaga sare, waxa kasoo baxa sadex xaraf oo kala ah; Jiim, Shiin iyo Ya’da xarakada qaadata sida kordhig, hoos dhig iyo godniinba. (ج، ش، ي).

Waa maxay goobta sideedaad? Imisa xaraf ayaa kasoo baxa?
Goobta sideedaad waa carrabka hareerihiisa iyo gawsaha dhexdooda, dhinaca bidixeed ama midigba, waxa kasoo baxa xarafka Dhaadka: (ض).

Waa maxay goobta sagaalaad? Imisa xaraf ayaa kasoo baxa?
Goobta sagaalaad waa carrabka hareertiisa ilaa laga gaadho carrabka ibtiisa iyo inta u dhaxaysa isaga iyo dhanxanaga sare, waxa kasoo baxa laamka: (ل).

Waa maxay goobta tobnaad? Maxaase kasoo baxa?
Goobta tobnaad waa ibta carrabka kana hoosaysa booskii laamka wax yar, waxa kasoo baxa Nuunka (ن).

Waa maxay goobta kow iyo tobnaad? Maxaase kasoo baxa?
Goobta kow iyo tobnaad waxay ka bilaabmaysaa booska nuunka hase ahaatee waxay uga dhowdahay carrabka dushiisa, waxa kasoo baxa Ra'da. (ر).

Waa maxay goobta laba iyo tobnaad? Maxaase kasoo baxa?
Goobta laba iyo tobnaad waxay ka bilaabantaa ibta carrabka ayadoo ay la socoto foolasha sare hoostooda oo carrabkuna aadayo dhanxanaga sare, waxa kasoo baxa sadex xaraf oo kala ah: (ط، د، ت).

Waa maxay goobta sadex iyo tobnaad? Maxaase kasoo baxa?
Goobta sadex iyo tobnaad waxay u dhaxaysaa ibta carrabka iyo foolasha sare iyo kuwa hoose dhexdooda, waxa kasoo baxa xuruufta safiirka loo yaqaano: ( ص، ز، س)

Waa maxay goobta afar iyo tobnaad? Maxaase kasoo baxa?
Goobta afar iyo tobnaad waa ibta carrabka iyo foolasha sare madaxooda, waxa kasoo baxa sadex xaraf oo kala ah: (ظ، ث، ذ).

Waa maxay goobta shan iyo tobnaad? Maxaase kasoo baxa?
Goobta shan iyo tobnaad waa dibinta hoose iyo foolasha sare madaxooda waxa kasoo baxa hal xaraf oo kaliya, waan fa'da: (ف).

Waa maxay goobta lix iyo tobnaad? Maxaase kasoo baxa?
Goobta lix iyo tobnaad waa halka u dhaxaysa laba dibnood, waxa kasoo baxa sadex xaraf oo kala ah: (و، ب، م), waawgu wuxuu soo baxaa marka dibnuhu furanyihiin, halka ba'da iyo miimku soo baxaan markay daboolanyihiin..

Waa maxay goobta todoba iyo tobnaad? Maxaase kasoo baxa?
Goobta todoba iyo tobnaad waa sanqaroorka, waxa kasoo baxda qunnada. Qunnahana waxa qaata nuunka reeban iyo tanwiinta marka la dhex galiyo ama lagu qariyo qunnaha, sidoo kale miimka iyo nuunka shadka wata ee la adkeeyay ayaa qaata qunnaha (sanqaroor ka hadalka).

# Tilmaamaha xuruufta

Waa maxay tilmaamaha xuruuftu?
Waa qaabka xarafku ugasoo baxo booskiisa, sida in la wayneeyo, la yareeyo, la fudaydiyo ama la adkeeyo iwm.

Waa imasa tilmaamaha xuruuftu?
Waa todoba iyo toban sida culumadu udoorteen.

Imisa qaybood ayay tilmaamahaasi u qaybsamaan?
Waxay u qaybsamaan laba qaybood; qayb leh kuwa liddi ku ah oo kasoo horjeeda waana shan tilmaamood iyo liddigooda. Qaybta kalena malaha wax liddi ku ah waan todoba tilmaamood.

Maxay yihiin kuwa liddiga leh?
Waxa weeye;  waynayn waxa kasoo horjeeda yarayn, adkayn waxa kasoo horjeeda fudaydin iyo wax u dhaxeeya labadooda, kor aadis iyo lidkiisa oo ah hoos aadis, daboolmid iyo lidkiisa oo ah furiniin iyo degdeg fudud iyo lidkiisa oo ah gaabis adag.

Maxay yihiin kuwa aan lidka lahayn?
Waa safiirka (siidhiga), qalqalada (laba dhac), dabacsanaan, leexniin, noqnoqosho, afka ku faafa iyo dheerayn.
Guud ahaan waa todoba, xaraf kasta wuxuu qaataa shan tilmaamood oo kamida tilmaamaha lidka leh, kuwa aan lidka lahayna wuxuu mararka qaarkood ka qaataa hal ama laba  ama waxba kama qaato.
Ugu badnaan halka xaraf waxa ku kulmi kara todoba tilmaamood. Faahfaahinteeduna waxay ku imanaysaa kitaab kale hadii Alle ogolaado.

# Meelaha lagu istaago Quraanka

Imisa qaybood ayay u qaybsantaa meelaha lagu istaago marka la akhrinayo Quraanka?
Waxay u qaybsantaa afar qaybood oo kala ah: dhamaystiran, ku filan, wanaagsan iyo mid xun.

Waa maxay istaaga dhamayska tiran?
Waa marka lagu istaago kalmad aan xiriir lalahayn waxa ka danbeeya ama kahorreya dhawaaq ahaan iyo macno ahaanba, sida marka lagu istaago: هُمُ الْمُفْلِحُونَ

Waa maxay istaaga ku filan?
Waa marka lagu istaago kalmad aan xiriir lalahayn waxa ka danbeeya ama kahoreeya dhawaaq ahaan balse macnahoodu isku xiranyahay sida marka lagu istaago kalmadan ku jirta suuratu Al-baqarah bilowgeeda; لَا يُؤْمِنُونَ waxay xaqiiqatan macnaheedu ku xiran yahay aayada ka danbaysa ee ah خَتَمَ اللَّهُ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ, oo ka warramaysa arrinka gaalada.

Waa maxay istaaga wanaagsan?
Waa marka lagu istaago kalmad uu xiriir ka dhaxeeyo waxa ka danbeeya ama ka horreeya dhawaaq ahaan, waxase shardi ah in hadalku ku dhamaystirmo kalmadaas, tusaale ahaan marka lagu istaago الْحَمْدُ لِلَّهِ ee suuratu Al-faatixa, kalmada ka danbaysa رَبِّ waa sifo Ilaahay leeyahay oo ku xiriirta waxa ka danbeeya kalmadii lagu istaagay dhawaaq ahan.
Sidoo kale marka lagu istaago kalmada عَلَيْهِمْ ee ku jirta suuratu Al-faatixa, maxaa yeelay ereyga غَيْرِ waa sifo ay leeyihiin dadka wanaagsan ama badalkeeda kuwa aan ku sifaysan baadida.

Waa maxay istaaga xun?
Waa marka lagu istaago eray aan macno samaynayn maadaama aan hadalkii dhamaystirnayn sababtoo ah waxa xiriir ka dhaxeeya kalmada inteeda hore iyo inteeda danbe, dhawaaq ahaan iyo macne ahaanba. Tusaale ahaan; marka lagu istaago بِسْمِ kaligeed ayadoon la raacin اللَّهِ, sidaasoo kale hadii lagu istaago الْحَمْدُ kaligeed ayadoon la raacin لِلَّهِ. Sababtoo ah lama garan karo waxa lagu darayo kalmadaas, ama waxay keenaysaa hadal aan ku haboonayn Ilaahay sw.

# Meelaha la aamuso

Meelahee ayaa la aamusaa qiraa'ada Xafsi?
Waxa la aamusaa afar meelood; Ta koowaad waxay ku jirtaa suuratu Al-kahfi, (وَلَمْ يَجْعَل لَّهُ عِوَجًا ۜ) waa la aamusaa inyar ayadoon la neefsan, kadibna wuxuu dhahayaa (قَيِّمًا).
Ta labaadna waxay ku jirtaa suuratu Yaasiin; (مَنۢ بَعَثَنَا مِن مَّرْقَدِنَا ۜ ۗ هَٰذَا). Ta sadexaadna waxay ku jirtaa suuratu Qiyaamah; (وَقِيلَ مَنْ ۜ رَاقٍ). Ta afaraadna waxay ku jirtaa suuratu Al-mudafifuun; (كَلَّا ۖ بَلْ ۜ رَانَ). Waxyar ayaa la aamusayaa kadibna ayadoon neef la qaadan ayaa lasii wadayaa.

# Waxyaalaha xaaraanta ah

Waxyaalaha xaaraanta ah ee lagusoo daray akhrinta Quraanka.

Maxaa lagu soo daray akhrinta Quraanka?
Waxa lagu soo daray akhrinta quraanka waxyaalo badan oo aan banaanayn sababtoo ah xadkii loogu talo galay xarafka dhawaaqiisa waa laga dheereeyaa ama waa laga gaabiyaa, ayadoo laxanada heesaha lagu ladhayo si dadka dhagahooda loogu soo jiito.

Waxa kamida in loo akhriyo sida laxanada heesaha ee soo noqnoqda, arrintaasi ma banaana sababtoo ah qaabkii quraanka loo akhrin jiray way ka baxsantahay, wax kale oo hadalkii Ilaahay lagu shabahayaa heeso ujeedadeedu tahay cayaar. Salafkuna arrintaa way reebeen sida in la jiido meel aan mad iyo jiidmo lahayn ama in jiidmo dheeraada oo aan luuqada carbeed lahayn la jiido.

Waxa kale oo kamida inuu ku nagaado meesha la aamuso kadibna uu ka boodo isagoo degdegaya.

Waxa kale oo kamida wax loogu yeedho murugo galin, waana in qofka quraanka akhrinayaa ka tago dabeecadiisa iyo caadadiisa oo uu la yimaado qaab kale oo uu iska dhigayo inuu murugaysan yahay oo uu ku dhowyahay inuu ilmeeyo, waxa arrintaa loo diidayna waa istusnimo ku jiri karta.

Waxa kamida wax loogu yeedho xarrifaad kuwaasoo kala jaraya akhrinta quraanka ayagoo koox ah oo hal cod kuwada akhrinaya, qaarkood ayaa kalmad akhrinaya kuwa kalena kalmada kale ayay akhrinayaan, mana eegayaan waxyaalaha ka dhalanaya arrintaas ee ay kamid tahay in ajarkoodii ay waayaan iyo waynida hadalkii Ilaahay oo meesha ka baxa, arrimahaas oo dhan waa xaaraan, mana la aqbali karo, waana waajib in la radiyo oo lagu inkiro cida sidaa samaynaysa.

# Takbiirta sababteeda iyo qaabkeeda

Waa maxay xukunka in la takbiirto marka Quraanka la dhameeyo?
In la takbiirto marka quraanku dhamaado waa sunne.

Waa maxay sababta loo takbiirtaa?
Sababtu waxa weeye waxyiga ayaa nabiga scw ka kala go'ay maamlo, waxa la yiri laba iyo toban maalmood, shan iyo toban maalmood ama afartan maalmood, kadibna gaaladii ayaa tidhi ayagoo colnimo u muujinaya rasuulka scw; Maxamed rabbigii waa ka tagay oo wuu sagootiyay, kadibna Jibriil ayaa soo dajiyay suuratu Al-Duxaa, markaasuu rasuulku scw takbiirtay markuu Jibriil ku dul akhriyay waxyigii uu sugayay darteed iyo beeninta gaalada awgeed.

Qaabkee loo takbiirtaa?
Qaabkeedu waa in la dhaho; Allahu Akbar, kahor intaan bisinka la qabsan. Wax kale oo lasoo wariyay in lagu kordhiyo tahliisha oo la dhaho sidan; لا اله الا الله والله أكبر بسم الله
Qaar kalena waxay kusii daraan taxmiida oo ah الْحَمْدُ لِلَّهِ
Halkee laga bilaaba takbiirta? Halkee lagu dhameeyaa?
Takbiirta waxa laga bilaabaa marka la dhameeyo suuratu Al-Duxaa, waxayna ku dhamaataa marka la akhriyo suuratu An-naas.

Tusmo

**هداية المستفيد في أحكام التجويد** **1**

**Hordhac** **1**

**Axkaamta isticaadada iyo bisin qabsashada** **1**

**Axkaamta nuunka reeban iyo tanwiinta** **2**

**Idhaarka (muujinta)** **2**

**Idqaamka (is dhexgalka)** **3**

Qaybta wadata qunnaha. 4

Qaybta aan qunnaha wadanin: 5

**Iqlaabka (isku badalka)** **5**

**Ikhfaa (Qarinta)** **6**

**Axkaamta miimka reeban** **6**

**Miimka iyo nuunka la adkeeyay (shad)** **7**

**Axkaamta (أَل) macrifada** **7**

**Laamka (ل) ficilka gala** **8**

**Idqaamka (Is dhexgal)** **9**

**Axkaamta Madka (jiidida)** **10**

Madka Asalka ah 10

Madka Faraca (Laamaha) 11

Jiidmada waajibka ah ee xiriirsan 11

Jiidmada banaan ee kala tagsan 11

Jiidmada reebniinku istaajiyay 12

Jiidmada badalka 12

Jiidinta lagu istaago tanwiinta 12

Jiidmada qasabka ah ee kalmada la cusleeyay. 12

Jiidmada qasabka ah ee kalmada la fudaydiyay. 13

Jiidmada qasabka ah ee xarafka la cusleeyay. 13

Jiidmada qasabka ah ee xarafka la fudaydiyay. 14

Jiidmada Dabacsan 14

Jiidmada Sila (siyaado). 14

Jiidmada kala farqinta (kala duwid) 15

Jiidamada Tamkiin (Hirgalin). 15

**Axkaamta Raa ((ر** **15**

Goormaa (ر) Ra'da la wayneeyaa? 15

Goormaa (ر) Ra'da la yareeyaa? 16

Waa goorma marka labaduba banaanyihiin? 16

**Axkaamta Qalqalada (laba dhac).** **16**

**Goobaha xuruuftu kasoo baxaan** **17**

**Tilmaamaha xuruufta** **19**

**Meelaha lagu istaago Quraanka** **20**

**Meelaha la aamuso** **20**

**Waxyaalaha xaaraanta ah** **21**

**Takbiirta sababteeda iyo qaabkeeda** **22**